**Ku-deeqidda Xubin & Unugyada**

*Ku-deeqidda xubin iyo unugyada waa ikhtiyaar shakhsi ahaaneed. La wadaag go'aankaaga qoyskaaga.*

**Waxaa diyaariyay Xarunta Caafimaadka ee Kaaliyayaasha Caafimaadka MUHC: Wendy Sherry & Bernard Tremblay oo la hawlwadaagay Adeegyada Dhiiga Kanada**

**Waa maxay ku-deeqidda xubin & unuyadu?**

Ku-deeqidda xubin iyo unugyadu waxa weeye ikhtiyaar aad dooran karto si aad uga caawiso inay dadka kale caafimaadkooda dib u helaan. Ku-deeqidda xubin waxay badbaadiyaan nolosha iyada oo loogu bedelayo xubno aan caafimaadka qabin. Ku-deeqidda unugyadu waxay hormar ku sameeyaan nolosha dadka iyada oo la hormarinayo muuqaalka ama laga hortagayo caabuqyada kadib marka uu qofku aad u gubto.

Ku-deeqidda xubnaha iyo unugyadu waxa la siiyaa dadka ugu baahi badan. Qoomiyadda, isirka, dakhliga ama xaaladda aqoonsiga qofku ma saameeyaan cidda ku deeqaysa xubnaha iyo unugyada.

Dhaqaalaynta iyo qadarinta jidhkaaga ayaa qayb muhiim ah ka ah nidaamka ku-deeqidda. Xubnaha waxaa lagu saaraa qaliin lagu sameeyo qolka qaliinka isbitaalka oo dabeedna la siiyaa qofka baahan. Unugyada iyo indhaha ayaa kadibna laga saaraa qofka. Sanduuqa aaska ee furan ayaa weli sii ahaan doona ikhtiyaari.

**Waa kuwee xubnaha iyo unugyada lagu deeqi karaa?**

Unugyadaha iyo unugyada lagu deeqi karo waxaa kamid ah:

*Xubnaha*
Wadnaha, sanbabka, xameetida, unugyada xameetida, beerka, kelyaha, caloosha iyo mindhicirada caloosha

*Unugyada*
Bu’da isha, Qaybta cad ee indhah “Sclera”, maqaarka, halbawlayaasha wadnaha, lafaha, iyo seedaha

**Yaa ku deeqi kara?**

Qof kasta ayaa u qalma, dhallaanka ilaa qofka wayn. Hay'adaha ku-deeqidda xubnaha ama unugyada ayaa eegi doona kiis kasta si loo go'aamiyo xubnaha iyo unugyada ay macquul tahay in lagu deeqo.

*Ka hadalka inuu dhiman doono qof waa shay adag, oo kaliya kuma adka qofka ee waxay ku adag tahay qoyska.*

**Miyaan weli ku deeqi karaa haddii aan xanuunsanayo?**

Xaaladaha caafimaadka ama inta uu le'eg yahay xanuunku kaama reebo inaad ku deeqdo xubin. Dhammaan ku-deeqayaasha waxaa loo qiimeeyaa si shakhsi ahaaneed, caafimaad, kiis-kis marka wakhtigeeda loo yimaado.

**Goorma ayay tahay in aan ka fikiro tan?**

Way adag tahay in laga hadlo dhimashada iyada oo la noolyahay. Laakiin ka hadalka go'aankaaga si aad isu-diiwaan geliso si aad u noqoto ruux ku deeqa xubin ama unug aad ayay muhiim u tahay. Qaraabadaada waa inay oggolaato inay u hogaansami doonto rabitaankaaga dhammaadka noloshaada; haddii aad hore ugala hadashay, way fududahay inaad samayso waxa saxda ah.

Hadii aad doonayso inaad ku deeqdo, kala hadal dhakhtarka qoyskaaga ama barnaamijka ku-deeqidda ee kumeelgaadhka ah.

**Sidee ayaan ugu deeqi karaa?**

Sida la diiwaangeliyo ku-deeqe xubin iyo unugyo ahaan gobolkaaga:

- https://www.donateyourorgans.ca/#register

Waxa aad doonto hadii aad go'aansato, waxa aad markasta heli doontaa daryeelkaaga munaasabka ah. Kala hadal qoyskaaga haddii aad doonayso inaad ku deeqdo iyo hadii kaleba. Waxa aad doorato markasta waa la xushmayn doonaa.

Fadlan xasuuso in u hogaansanka ku-deeqidu uu dhici doono oo kaliya marka uu ku dhawaaqo in aad geeriyootay Dhakhtarku.

Go'aanaaga inaad ku deeqdo xubnahaaga iyo unugyadaada dhammaadka naftaadu waxay ka caawinaysaa dad kale inay noolaadaan ilaa ay ka geeriyoonayaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan iimeel noogu soo dir OTDT@blood.ca.